Gymnasiesärskolan
Programmet för hantverk och produktion

Soomaali
Somaliska

Skolverket

Utbildningsinfo

# Barnaamijka farsama gacanta iyo wax soosaarka

Barnaamijka farsama gacanta iyo wax soosaarka waxuu ku habboonyahay qofkii raba inuu ka shqeeyo farsamo gacameed ama wax soosaarka nuucyihiisa kala duwan.

Barnaamijka waxuu ku habboonyahay qofkii xiiseynaya inuu ka shaqeeyo shaqo gacameed lagu soo saaro alaab.

## Waxaan ayaad barnaamijka ku baran doontaa

Waxaad ka shaqeyneysaa howlo la xiriira farsamo gacmeedka iyo wax soosaarka.

Waxaad baraneysaa qaabka loo sameeyo shaqooyinka farsamo gacmeedka iyo wax soosaarka iyo mashiinnada la isticmaalo. Waxyaabaha la sameynaayo waxeey noqon karaan sameynta shey farsamo gacameed ah, rakibidda iyo alxamidda/alxanka.

Waxaad baraneysaa sida loo isticmaalo qalabyada kala duwan iyo in loo isticmaalo si tixaddar leh.

Waxaad baraneysaa siyaabo kala ee wax loo soosaaro iyo cilmi ku saabsan walxaha kala duwan ee farsamo gacmeedka iyo wax soosaarka.

Barnaamijka waxaad tababar ugu qaadaneysaa sidii aad dad kale ula shqeyn laheyd iyo sida aad adeeg fiican u siin kareyso dadka macaamiisha ah.

Su'aalaha la xiriira goobaha shaqada waa qeybo muhiim ah oo barnaamijka ka tirsan si uusan dhaawacyo kaaga soo gaarin shaqadaada mustaqbalka iyo si aad u heshid caafimaad wanaagsan.

## Sidaan ayuu barnamijka u degsanyahay

**Maaddooyinka barnaamijyada dugsiyada sare ee dadka caqliga dhiman oo dhan eey kawada siman yihiin.**

Dugsiyada sare ee dadka caqliga dhiman ee wadanka oo dhan ku yaal waxeey leeyihiin maaddooyin la barto oo eey kawada simanyihiin.

Waxaana la yiraahdaa Maaddooyinka barnaamijyada dugsiyada sare ee dadka caqliga dhiman oo dhan eey kawada siman yihiin.

Maaddooyinkaas waa:

- Ingiriis
- Maaddada farshaxanka
- Taariikh
- Maaddada jimicsiga ciyaaraha
- xisaaab
- saynis
- diin
- cilmiga mujtamaca
- luqadda iswiidhishka ama luqadda iswiidhishka ee loogu tala galay ajaanibta

**Maaddooyin kawada dhexeeya barnaamijka waxbarasho**

Barnaamijka waxuu leeyahay maaddooyin kuwo xirfadeed ah ama maaddooyin astaan u ah waxaana leesku yiraahdaa maaddooyinka kawada dhaxeeya barnaamijka.

Ardayda dhigata barnaamijka farsama gacanta iyo wax soosaarka oo dhan weey akhrisanayaan maaddooyinkaan:

- Naqshadeynta
- farsamo gacmeedka iyo wax soosaarka
- qalabyada kala duwan

## Kusii qoto dheerinta barnaamijka

Waxaad baraneysaa maaddooyin badan oo kor uqaadaya cilmiga barnaamijka aad dalbatay. Waxaa lagu magacaabaa qoto dheerin aad ku sameyneysid barnaamijka.

Maaddaama iskoollada eey hayaan maaddooyin kala duwan oo qoto dheerin ardayda ku sameyn karaan waxaad la xiriirtaa iskoolka aad dalbaneysid waxaadna weeydiisaa maaddooyinka qoto dheeridda looga sameeyo ee iskoolkaas.

Warbixin dheeraada oo arrinkaas ku saabsan waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee www.skolverket.se, qeybta ka hadleysa iskoollada xanaanada carruurta iyo iskoollada.

## Doorashada madaxa bannaan

Waxaad kaloo sameyn kartaa doorasho madax banaan. Waxaad iskaa u dooran kartaa maaddooyin aan ku jirin kuwa laga barto barnaamijka aad dalbatay, waana maaddooyin eey ardayda iskoolka oo dhan eey akhrisan karaan.

## Qorshaha jiheynta maaddada

Maaddo kasta oo dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman laga dhigto waxeey leedahay qorshaha jiheynta maaddada oo eey ku qoron yihiin koorsooyinka maaddooyinka eey ka kooban yihiin iyo dhibcaha lagu heli karo.

Haddii aad ka bixi kartid waxuu mudiirka iskoolka go'aamin karaa inaad dhigatid maaddooyinka laga barto dugsiga sare ee caadiga ah. Taasina waxeey kor u qaadeysaa hiigsigaada waxbarasho.

## Natiijo

Natiijo waxaad heleysaa markaad dhameysatid maaddo ama koorso. Macalinka ayaa qiimeyn ku sameynaya cilmiga aad baratay asigoo saldhig uga dhigaayo natiijooyinka A, C iyo E.

## Apl

Cilmiga aad kasoo baratay barnaamijaka aad dhigatid waxaad baraktiik ahaan ugu sameyneysaa goob shaqo.

Waxaa la yiraahdaa waxbarasho lagu sameynayo goob shaqo, marka lasoo gaabiyana waa Apl.

## Shaqada dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman

Si aad u muujisid waxa aad ku baratay barnaamijka waxbarasho ee aad dhigatid waxaad sameyneeysaa Shaqada dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman.

Maaddaama shaqada aad sameyneysid eey tusineyso waxa aad soo baratay oo dhan waxaad sameyneeysaa dhamaadka waxbarashadaada.

## Qorsho waxbarasho oo gaar ahaaneed

Waxaad leedahay qorsho waxbarasho oo gaar kuu ah. Waxaana ku qoran maaddooy-inka iyo koorsooyinka aad dhiganeysid muddada waxbarasho ee dugsiga sare.

Go'aankasta oo ku saabsan waxa aad dhiganeysid waxaa laga helayaa qorshaha waxbarasho ee gaarka kuu ah.

## Shahaaddada dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman

Markaad afar sano kadib dhameysid dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman waxaa lagu siinayaa shahaaddo muujineysa waxyaabaha aad soo baratay iyo khibradaha aad kororsatay waqtiga aad dhiganeysay dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman.

Shahaaddada dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman waxeey tusineysaa inta dhibco aad heshay muddada afarka sano aheyd ee aad waxbaraneeysay.

Haddii aad ku baastay maaddooyinkaada oo marka leesku daro ku siinaya 2500 oo dhibcood waxaad dhameystir buuxo ku sameysay waxbarashadaada dugsiga sare ee dadka caqliga dhiman.

## Sidaan ayaad u shaqeyneysaa markaad dhigatid barnaamijka

Su'aalaha kala duwan waxaad ugu shaqeyneysaa hab shaqo gacameed ah iyo hab cilmi baaris labada ba.

Waxaad horumarin ku sameyneysaa la shaqeynta dad kale. Waxaad kaloo horumarin ku sameyneysaa inaad si madax bannaan u shaqeysid iyo inaad mas'uuliyad qaadi kartid

Barnaamijka waxuu tababar kuu siinayaa sida loo wada xaajoodo, sida loo fikiro iyo sida aad u dhiiban kartid fikradaada.

Waxaad horumarin ku sameyneysaa inaad sharrixi kartid sida aad ugu shaqeyneysid leyliska laguu diro.